**Tr 20: 11/09/2019**

# WAR-SAXAAFADEED

**MUQDISHO, 20 NOVEMBER 2019,** Dowladda Federaalka Soomaaliya Waxay si adag u Cambaaraynaysaa ficilka lagu dilay Almaas Elman oo maanta ku geeriyootay magaalada Muqdisho. Marxuumad **Almaas Elman** waxay ahay gabar da'yar ah oo u Ollo leysa Xuquuqda Aadanaha, islamarkaana aheyd Diblumaasi Soomaaliyeed oo kasoo shaqeysay Safaaradda Soomaaliya ee Dalka Kenya. Sidoo kalana Aabaheed oo isagana lagu xasuusto kaalintii uu ku lahaa ilaalinta Xuquuqda Aadanaha iyo Nabadda oo isaguna sidaasoo kale ugu dhintay Difaacidda Xuquuqda Aadanaha iyo Raadinta Nabada Xisilooni ka dhalata Sooomaaliya.

Dowladda Soomaaliya waxay Marxuumad **Almaas** Allaah uga baryeysaa inuu Janadii Fardowso ka waraabiyo, Samir iyo Iimaana kasiiyo qoyskii, qaraabadii iyo Guud ahaan umada Soomaaliyeed ee ay ka baxday.

Ugu Dambeyntii Dowladdu waxay shacabka Soomaaliyeed U xaqiijinaysaa inuu socdo Baaritaan adag oo lagu soo qabanayo Cadaaladana lagu hor gaynayo cidii ka danbaysay dilka gabadhaas qiimaha badan laheyd.

**Innaa Lilaahi Wa Innaa Ilayhi Raajicuun**

**Afhayeenka Wasaaradda Warfaafinta Dowladda Federaalka Soomaaliya**

**Mudane**:- Ismail Mukhtar Omar